

SIDA LOO DALBADO NUQULADA DIIWAANGELINTA & SARTIFIKEEDYADA

XASUUSIN: Haddii aad diiwaangelisay ganacsi oo aad dhawaan dhammaystirtay ku diiwaangelinta khadka internetka oo aadan ku helin nuqulka diiwaangelinta email ahaan, waxaad geli kartaa akoonkaaga khadka internetka oo waxaad aadi kartaa taariikhdaada macaamilka si aad u soo dejisato nuqulka diiwaangelinta.

Dhammaan kharashyada dalabaadka waxaa laga heli karaa halkan <https://www.sos.state.mn.us/business-liens/business-forms-fees/business-filing-certification-fee-schedule/>

Sida loogu Dalbado Nuqulada & Sartifikeedyada Khadka Internetka:

Nuqulada iyo Sartifikeedyada waxaa lagu soo celinayaa elektaroonig ahaan. Sartifikeedyada waxaa la bixiyaa isla markiiba kolka lacagta la bixiyo, iyadoo ay dalabyada nuqulada qaar ka mid ahi qaadan karaan 7 ilaa 10 maalmood.

- 1) **Booqo Bogga Diiwaangelinta Ganacsiga ee internetka oo ah** <https://mblsportal.sos.state.mn.us/Business/Search> si aad u bilowdo.
- 2) **Raadi diiwaangelinta ganacsiga:** waxaad ka raadin kartaa kaydkeena khadka internetka qaybta "Search Business Filings" ("Raadi Diiwaangelinta Ganacsiga") Waxaad ku raadin kartaa adiga oo isticmaalaya magaca ganacsiga ama lambarka faylka ee ka soo baxay xafiiskeena. Haddii aad rabto inaad ku raadiso lambarka faylka hubi inaad gujiso ereyada "File Number" ("Lambarka Faylka") ka hor intaadan gelinin lambarka.

XUSUUSIN: Higaada gaarka ah ee magaca ganacsiga looma baahna marka lagu raadinayo magaca ganacsiga.

- 3) **Qalabyo Dheeraad ah:** Sanduuqa raadinta hoosteeda waxaa ku yaalla xoogaa qalab raadin dheeraad ah oo aad u adeegsan karto si aad u hesho diiwaangelinta ganacsiga ee nidaamkeena:
 - a) **Baaxadda Raadinta:** Haddii aad doorato "Begins With" ("Ka Bilowda") raadintu waxay soo heli doontaa diiwaangelinta ganacsiga ka bilaabmaysa isla ereyada aad geliso. Haddii aad doorato "Contains" ("Ka midyahay") raadintu waxay soo heli doontaa dhammaan diiwaangelinta ganacsiyada ee ay ku jiraan ereyada aad geliso.
 - b) **Xaaladda Diiwaangelinta:** Haddii aad doorato "Active" ("shaqaynaya"), raadintu waxay soo heli doontaa oo keliya diiwaanka ganacsiya cusboonaysiisan ee leh

magaca ama lambarka faylka ee aad gelisay. Haddii aad doorato "Inactive" ("Aan shaqaynaynin"), raadintu waxay soo heli doontaa keliya diiwaanka ganacsiyada uu ka dhacay ee leh magaca ama lambarka faylka ee aad gelisay.

Ku dar Magacyadii Hore: Haddii aad doorato "Exclude" ("Ka reeb"), raadintu waxay soo heli doontaa wixii diiwaangelin ganacsi ah ee leh magaca saxda ah ee aad gelisay. Haddii aad doorato "Include" ("Ku dar"), raadintu waxay soo heli doontaa diiwaangelin kasta oo ganacsi oo horey uga diiwaangashanayd xafiiskeena iyadoo la adeegsanayo magaca aad gelisay. Raadinta "Include Prior Names" ("Ku dar Magacyadii Hore") ayaa ah midda ugu waxtarka badan leh marka la raadinayo shirkad laga yaabo inay beddeshay magaceeda ganacsi

- 4) **Booqo Business Record Details (Faahfaahinta Diiwaanka Ganacsiga):** Marka aad hesho diiwaangelinta ganacsiga aad raadinayso, guji erylga "Details" ("Faahfaahinta") ee ku yaalla dhinaca midig ee shaashadda.
- 5) **Dalbo Nuqulo:** Guji sanduuqa "Order Copies" "Dalbo Nuqulo" oo ku taalla xagga sare ee bogga oo ku gayn doonta "Taariikhda Diiwangelinta" Diiwaangelinta si kala gooni ah ayaa loo liisteyey. Raadi nooca diiwaangelinta ee aad jeceshahay inaad dalbato oo calaamadee sanduuqa ku xiga dukumiintiga u dhigma. Kadib marka aad doorato diiwaangelinta aad rabto inaad dalbato waxaad gujin kartaa sanduuqa ay ku qorantahay "Order Selected Copies" ("Dalbo Nuqulada aad Xullatay").
- 6) **Dooro Nuqulada La Xaqiijiyay ama Kuwa Aan La Xaqiijin:** Kadib waxay ku waydiin doontaa inaad doorato Nuqulada La Xaqiijiyay ama Kuwa Aan La Xaqiijin. Nuqulka La Xaqiijiyay waxaa ku jira bog dheeri ah oo wata shaabada xaqiijinta oo sheegaysa in dukumiintiga (dukumiintiyada) ay yihiin run oo ay yihiin nuqulo dhamaystiran sida looga xareeyay xafiiska diiwaanka.

Xusuusin: Dukumiintiyada cinwaankoodu yahay "Original Filing" ("Diiwaangelin Asal ah") waa diiwaangelintii la soo gudbiyay markii ugu horraysay ee laga soo diiwaangeliyey xafiiskeena. Tusaale: Shirkad MN ah waxay noqonaysaa nuqulka Sartifikeedka iyo Qormooyinka Aaasaaska, Magaca la qaatay wuxuu u noqon karaa koobiga Sartifikeedka Magaca la qaatay, iwm.

- 7) **Gali Macluumaadka Keenitaanka:** Ku qor cinwaanka emailka meesha aad jeclaan lahayd nuqulada in laguugu soo diro. Dhammaan dalabyada nuqulada ee khadka internetka ayaa elektaroonig ahaan loogu soo celiyaa cinwaanka emailka ee ku qoran shaashadan. Nuqulada dalabyada qaar ka mid ahi waxay qaadan karaan 7 ilaa 10 maalmood in la keeno.

Waa maxay Sartifikeed Xaalad Fiican (Good Standing)?

Sartifikeed Xaalad Fiican (Good Standing) waa sartifikeed muujinaya in hay'ada ganacsi ay diiwaangashantahay oo uu hadda diiwaankeedu shaqaynayo si ay uga ganacsato gobolka laga soo saaray; wakhtiga la soo saaray.

Si aad Khadka Internetka ugu dalbato Sartifikeedka Xaaladda:

1. **Raac tallaabooyinka 1-4 ee kor ku xusan.**
2. **Ka dooro "Order Certificate" (" Dalbo Sartifikeed") shaashadda faahfaahinta ganacsiga:** Marka aad gasho shaashadda Faahfaahinta Diiwaanka Ganacsiga guji badhanka Order Certificate (Dalbo Sartifikeed) (oo u dhow dusha kore ee bogga).
3. **Gali Macluumaadka Keenitaanka:** Dhamaan Sartifikeedyada Xaaladda waxaa si toos ah loogu soo dirayaa cinwaanka emailka ee aad ku qorto boggan 10-15 daqiiqo gudahood kadib marka aad bixiso lacagta.
4. **Xir shaashada soo booday (pop-up) adiga oo gujinaya "Ok".**
5. **Guji Submit (Gudbi) si aad u dhamaystirto dalabka.**
6. **Qoro Lambarka Dalabkaaga:** Qoro ama daabaco Lambarka Dalabka ee ku qoran bogga Xaqiijinta Dalabka. Tan waxaa u adeegsan kara xafiiskeena si loo helo Dalabka haddii ay jiraan wax cillado ah.
7. **U sii soco Lacag Bixinta:** Marka aad gasho websaydka Bangiga US Bank waxaad fursad u heli doontaa inaad ka samaysato akoon adeega elektarooniga ah ee US Bank. Akoonka elektarooniga ah ee Bangiga US Bank ayaa kaydinta doona macluumaadka kaarkaaga bangiga si loogu adeegsado macaamilkaaga mustaqbalka.
8. **Dooro "Pay Without Registering" ("Bixi Lacagta Bilaa Diiwaan Gelin"):** Waxaad dhaafi kartaa isudiiwaangelinta adeegyada elektarooniga ah ee Bangiga US Bank adiga oo gujinaya "Pay Without Registering" ("Bixi Lacagta Bilaa Diiwaan Gelin"). Tani waxay kuu ogolaanaysaa inaad fuliso lacag bixin hal mar ah adiga oo adeegsanaya kaarkaaga bangiga.
9. **Dhammaystir howsha lacag bixinta:** Bangiga US Bank wuxuu aqbali doonaa Visa, Mastercard, Discover ama American Express.
10. **Filo Laba Email:** Marka lacag bixintu ay dhammaystiranto waxaad heli doontaa laba email. Hal email wuxuu noqon doona email lagu xaqiijinayo lacag bixinta oo ka yimid US Bank hal emailna wuxuu noqon doonaa ogaysiis ka socda xafiiskeena marka dalabka la hawl galiyay.
11. **Soo dejiso sartifikeedkaaga:** Waa inaad gujiso link-ga ku dhexjira emailka si aad u soo dejisato nuqul sartifikeedkaaga ah. **Link-gu wuxuu shaqaynayaa oo keliya 90 maalmood.** Sartifikeedka waxaa cinwaan looga dhigay "Data Report" ("Warbixinta Xogta") oo wuxuu ku jiraa bogga link-gu uu kuu keenayo wuxuuna ku jiri doonaa Qaabka PDF ah.

Sida loogu Dalbado Nuqulada & Sartifikeedyada Boostada:

Codsi qoraal ah ama isticmaal Foomka Nuqulka/Sertifikeetka Shirkada oo laga heli karo halkan <https://www.sos.state.mn.us/media/2981/certificatecopyrequest.pdf> oo u soo dir ciwaanka hoose oo iyadoo ay la socoto khidmada khusaysaa.

Minnesota Secretary of State
First National Bank Building
332 Minnesota Street, Suite N20
Saint Paul, MN 55101

U qor jeega ama money order: MN Secretary of State